



## OnPoint Excellence waxa ay ku maamuuseen abbaalmarin Macalimiinta PPS iyo iskuulada heerkoodu sareeyo

Labo macallin oo ka mid ah macalimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa loo magacaabay in ay ku soo baxeen kaalinta kama dambeysta ahaa Abbaalmarinta Sanadka ee OnPoint Educator, kuwaasi oo hoggaamka u qabtay sidii ay ugu soo bandhigeen barnaamijka PPS ee Waxbarashada OnPoint Excellence.

- **Ali Herron**, waa bare wax ka dhigta Dugsiga Marysville K-8, waxa ay ka mid tahay labada macallin ee kaalinta kama dambeysta ku soo baxay qeybtat K-8.
- **Matt Sten**, waa barre dhiga maadadda culuunta bulshada Dugsiga Sarre ee Cleveland, isaguna wuxuu ka mid yahay labada macallin ee ku soo baxay kaalinta kama dambeysta ah ee qeybta 9-12.

Herron waxaa lagu ammaanay hoggaaminteeda waxbarashada iskuulkeeda ee ah in ay ardaydu ay noqdaan kuwa soo jeeda naxariisna leh iyo waliba bulshada waxbarashada ee gobolka oo dhan, sidoo kale isku xirnaanta qotada dheer ee midka bulsho iyo waliba taageerida shuxuurta taasi oo ardayda ka taageerto.

"Ma jirto dariiqo ka wanaagsan oo aan uga fikiri karo sidii loo dhisi lahaa aasaaska guusha ilmaha noloshiisa oo aan ahayn in Ali u noqoto macalimadooda Xannaanada Bilowga," sidaasi waxaa ku sheegay cadeyn ay bixisay maamulihii hore ee iskuulka Marysville oo la yiraa Lana Penley!.

Sten waxa lagu yaqaan inuu u dhigo taariikhda sidii ay tahay sheeko oo kale, isaga oo siiya ardayda dhawr dariiqo oo ay ardaydu u fahmi karaan, sameeyaan baarintaan, ka dibna ay abuuraan falanqeyn. Wuxuu kale oo uu siiyaa ardaydiisa fursad ay ku qaadanaayaan khatar dhinacooda aqooneed ah iyaga oo horumarinayaan aqoontooda iyo xirfadahooda.

"Wuxuu noo tababaray in aan si qoto dheer arrimaha u eegno, isaga oo naga caawinaya sidii uu noo fahamsiin lahaa aqoon ahaan iyo sidii loo qaadaa dhigi lahaa, iyaga oo dadku ay gaari karaan meesha ugu sareysa ka dibna ay dunida ka dhigi karaa meel wanaagsan," sidaasi waxaa yiri Marcella Loprinzei Harden, oo ah arday uu macallin u ahaan jiray Sten haddana qaadanaaya shahaadada ugu dambeysa ee Ph.D Jaamacada Georgetown isaga oo ku qaadanaaya maadadda taariikhda.

Herron iyo Sten midkiiba wuxuu heli doonaa lacag dhan \$5,000, iyo waliba \$1,500 oo dheerad ah iyada oo lacagataasi la siin doono iskuuladooda. Abbaalmarinta Sanadka ee Macalinka waxaa la shaacin doonaa maalinta Arbacada, bisha Maayo 27keeda, iyada oo labada macallin ee ku guuleysta sanad dhan lacagtii ijaarka guryaha laga bixinayo, sidoo kale waxa iskuuladooduna ay heli doonaan lacag dhan \$2,500..

Waxaa kale oo jiray labo macallin oo PPS kana mid ahaa murashaxiinta loo magacaabay Circle of Excellence(Kooxda Taya'ada Leh), iyaga la siinayo abbaalmarin lacageed oo dhan \$1,500 iyo \$1,000 macalimiinta iskuuladooda: Alfonso Garcia Arriola, waa macallin dhiga maadadda sayniska barrena ka ah ACCESS Academy, iyo Jesse Gardner, isaguna waa macallin dhiga luqada Ingiriiska Dugsiga Sarre ee Madison High.

Waxaa kale oo jira labo macallin oo Dugsiyada Dadweynaha Portland ah iyaguna waxa ay ku guuleysteen abbaalmarin lacageed ee mashruuca Dhisayaasha Bulshada OnPoint. Dugsiga Hoose ee Grout waxa uu ku guuleystay abbaalmarinta ugu sareysa, taasi oo lagu go'aamiyey markii cod dhinaca online ka ah ay bulshadu u qaaday. Iskuulka Grout waxa uu u lacagtaasi dhan \$ 5,000 in ay ku dayactiraan garoonka lagu ordo ee iskuulka.

Dugsiga Hoose ee Atkinson waxa uu helay lacag dhan \$2,000 inuu ku maalgaliyo beertiisa iyo mashruuca karinta cunto dhaqameedka.